

BALLAADHINTA FARXADDA CIIDDA ARC OO MASHRUUCA QAYBINTA ODXADA





05



MASHAARIICDA
ARRIMAHA BULSHADA



06



ADEEGYADA IYO
HAWLAHA SAMAFAL EE
CAAFIMAADKA



07



MASHAARIICDA
XOOGSI XALAAL AH



09



HAWLAHA
WAXBARASHADA



Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278256
Phone: +252514333
E-Mail:
Website: www.arcsom.org

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (32) May 2024



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society





MAAMULKA ARC OO KORMEERAY MASHAARIICDA KA SOCDA JIGJIGA DDS



Maamulka ARC Oo Kormeeray Mashaariicda Ka Socda Jigjiga DDS

Guddoomiyaha guud ee ARC ayaa kormeeray mashaariicda kala duwan ee ay hay'addu ka waddo deegaanka Soomaalida ee Itoobiya. Waxaana booqashada ku wehelinayey Eng Cabdiraxmaan Thaamir, madaxa mashaariicda iyo Barnaamijyada ARC.

Waftiga guddoomiye Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi ayaa xogogaal u noqday habsami u socodka hawlaha maamul, maaliyadeed iyo mashaariicda ka socda dawlad deegaanka. Waxa aanay kulamo kor loogu qaadayo iskaashiga iyo xidhiidhka la qaateen masuuliyiinta dawladda iyo hay'adaha madaxa bannaan ee wada shaqaynta ay leeyihiin hay'adda, iyo maamulka gobalka ee ARC u qaabilsan deegaanka.

Waftigu waxa uu booqday dhul uu golaha sare ee arrimaha Islaamka ee dawlad deegaanku ugu deeqay hay'adda ARC



si looga dhiso xarumo waxbarasho iyo horumarineed, waxa kale oo uu kormeeray xarunta dhaqanka ee Sanad, ceel biyood riig ah oo ay fulintiisu ka socoto magaalada Jigjiga, Masaajidka Abu Bakar Siddiiq iyo dugsiga Iftin oo dhammaan ka mid ah mashaariicda ay ARC ka fulisay gobalka, isaga oo dhinaca kalana la wareegay dhul isagana loogu deeqay in laga dhiso Masaajid.

Muddo laba maalmood ah oo uu booqashadan ku guda jiray, waftigu waxa uu kulamo la qaatay masuuliyiinta maamulka iyo mashaariicda ee xafiiska Dawlad deegaanka, kuwaas oo uu ugu horreeyo maamulaha xafiiska Dawlad-deegaanka Soomaalida, Mudane Cabdiraxmaan Khadar, waxa aanu ka dhegeystay warbixinta mashaariicda kala duwan ee socda ama dhammaaday, habsami u socodka Barnaamijka kafaala qaadka agoonta, iyo guud ahaan hawlaha samafal ee ka socda gobalka.



MASUULIYIIN IYO HALDOOR KALA DUWAN AYAA BOOQASHO KU YIMI XARUMAHA ARC



Bishii aynnu soo dhaafnay ee May, masuuliyiin kala duwan iyo shakhsiyaad haldoorka bulshada ka mid ah ayaa booqasho iyo barasho ku yimi xarunta Kuweytiga magaalada Hargeysa. Waxaa ka mid ahaa guddoomiyaha jaamacadda Shaqaalaha ee magaalada Hargeysa (CSI), mudane Cumar Iid Qalonbi oo ay wehelinayeen xubno ka mid ah masuuliyiinta waaxyaha kala duwan ee jaamacaddu. Waxa kale oo martida-sharafta Bishan ka mid ahaa masuuliyiin ka socday wasaaradda arrimaha gudaha Somaliland, iyo sida oo kale Sheekh Cabdixakiim Suufi, khadiibka iyo Imaamka Masaajidka Al-Amiiri iyo haldoor la socday.

Martidan oo si gaargaar ah u soo booqday xarumaha Kuweytiga, waxaa ku soo dhoweeyey masuuliyiinta hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) oo uu ugu horreeyo guddoomiyaha Guud, Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi. Waxaana martida lagu soo wareejiyey qaybaha kala duwan ee xarunta Kuweytiga oo ay ka mid yihiin dugsiyada waxbarashada heerarkooda kala duwan, mac-hadyada farsamada gacanta iyo



xirfadaha, beerta iyo qaybaha kale ee waxsoosaarka iyo samafalka qaabilsan. Iyada oo qayb kastana laga siiyey xog waafi ah oo la xidhiidha hawlaha ka socda.

Waftiyadan kala duwan ayaa dhammaantood ka marag kacay kaalinta muhiimka ah ee ay ARC kaga jirto hawlaha samafalka iyo horumarinta bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, beeraha, iyo kaalmada bani aadamnimada. Iyaga oo muujiyey dareenkooda ku aaddan xarumahan oo qaarkood ay ahayd markii ugu horreysay ee ay yimaadaan, sidaas dhowna xogogaalka ugu noqdaan hawlaha ay ARC ka waddo Somaliland iyo guud ahaan dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

Dhinaca kalana Dr. Cabdiraxmaan Mucallimi ayaa martida uga mahadnaqay booqashadan ay ku karaameeyeen, isaga oo sheegay in ka midho dhalinta hawlaha samafal iyo horumar aanay ka maarmayn iskaashiga dhinacyada kala duwan ee ay khusayso, iyo in bulshada waddanku ay garab istaagto dadaallada kor loogu qaadayo nololaha bulshadeenna.





BALLAADHINTA FARXADDA CIIDDA ARC OO MASHRUUCA QAYBINTA ODXADA

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa ku dhawaaqday ololaha ay oxdada Ciidda sannadkan 1445 Hijriyada, ku gaadhsiiyayso deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika. ARC waxa aanay sannadkan halkudheg u qaadatay, 'Ajar iyo Farxad' iyada oo mashruucanna la kaashan doonta hay'ado iyo ururro maxalli ah iyo kuwo caalami ah labadaba. Sannad kasta tobannaan kun oo qoysaska baahan ka mid ah, ayaa ciidda Oxdada ay gaadhsiiisaa hilibka oxdada si ay walaalahooda kale ugala qayb galaan farxadda maalintaas.

Qaybinta Oxdadu waxa ay ka mid tahay Barnaamijka 'Amniga Cuntada' ee ARC ay ka fuliso gobalka Geeska Afrika, iyada oo ka jawaabaysa dhibaatooyinka bani'aadamnimo ee ka jira inta badan ee deegaannada Soomaalida ee Geeska Afrika, gaar ahaan dhinacyada nolosha oo ay ugu horreso cuntadu. Tira koobyada ay samaysay Qaramada Midoobey waxa ay muujinayaan, in dad gaadhaya 4.3 Milyan oo qof ay dhibaato cunto yaraan ahi ku haysato gobalka Geeska Afrika

ADEEGYADA IYO HAWLAHA SAMAFAL EE CAAFIMAADKA



ARC OO FULISAY QALLIIN INDHA JEEXIS AH OO BILAASHA

Cisbitaalka 'Hargeysa International Hospital' (HIH) ayaa ku guulaystay, qalliin bilaash ah oo uu indhaha ugu jeexay bukaan ka mid ah qoysaska saboolka ah ee magaalada Hargeysa.

Qalliinkan ayaa qayb ka ahaa mashaariicda adeegga caafimaadka ee ay ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, kaas oo ay sannad kasta ka faa'idaystaan boqollaal ka mid ah dadka aan awoodin in ay iska bixiyaan kharashaadka caafimaadka, gaar ahaan takhasusyada qaaliga ah.

Waxaa ka mid ah ololayaal caafimaad oo dhakhaatiirta takhasuska ah ee cisbitaalka HIH ku tagaan xaafadaha danyartu degaan, iyo deegaannada baadiyaha ee

magaalooyinka ka fog, iyaga oo dadka u sameeya wacyigelin, baadhiso caafimaad, la talin iyo dawooyinka ay u baahan yihiin oo bilaash ah.

Barnaamijka caafimaadka ee ARC, waxa kale oo ka mid ah cisbitaallo iyo rugo caafimaad oo si hersare ah u qalabaysay oo ay ka hirgelisay magaalooyin kala duwan, isla markaana gacanta ku hayso ka shaqaysiintooda. Waxaa ka mid ah cisbitaalka HIH oo ay ka hawlgalaan dhakhaatiir takhasusyo sare u leh caafimaadku.

Mashaariicda ARC waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo laga leeyahay dalka Kuweyt.



MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA



ARC Oo Ilo-dhaqaale U Abuurtay Qoysas Sabool Ah



Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' ee hay'adda Gargaarka Afrika (ARC), waxa uuu shaqo abuur u sameeyey shan ka mid ah qoysaska saboolka ah ee Soomaaliyeed.

Miisas booshari, miisaska dharka lagu iibiyo, iyo khudradihii iyo badeecadihii raasamaalka bilowga ah u noqon lahaa meheradda, ayaa ay ku wareejiyeen shan qoys oo ku kala nool magaaloyinka Burco iyo Boorama ee Somaliland, iyo magaalada Muqdisho ee xarunta Soomaaliya.

Barnaamijka Xoogsi xalaal ah oo ka mid ah mashaariicda ARC ee sannad kasta ay ka faa'idaystaan boqollaal qoys oo danyar ah, ujeeddadiisu waa in il dhaqaale loo abuuro bulshada danyarta ah, taas oo ay ka mid tahay in shaqo abuur loo sameeyo, in meherado ganacsi oo yaryar loo furo, in kuwa baadiyaha ee xooluhu ka baxaan la xooloeyo, iyo la baro xirfado ay ku shaqaystaan. Barnaamijkan waxaa maalgeliya samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt oo soo mariya hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



ARC Oo Ganacsiyo Yaryar U Abuurtay Haween Kale Duwan



Haweenku waa lafdhabafta qoyska Soomaaliyeed, gaar ahaan xilliyada colaadaha, abaaraha iyo xaaladaha dhaqaale xumo ay jiraan. Iyaga ayaa udub dhexaad u noqda nolosha qoyska baadiyaha iyo magaalada labadaba.

ARC oo arrintaas maanka ku haysaa, waxa ay dhowaan Makiinadda dawaarka ku wareejisay mid ka mid ah haweenka magaalada Muqdisho, si loogu abuuro il dakhli soosaar oo ay ka dabbarto nolosha qoysaskeeda. Kaddib markii la siiyey tababar la xidhiidha tolista, jarjarista iyo nashqadaynta tolmaha dharka.

Sannad kasta tobannana haween ah ayaa ay ARC siisaa tababarro xirfadeed

iyo qalabka xirfadahaasi ku shaqeyaan oo Makiinadaha dharku ay ka mid yihiin, taas oo qayb ka ah Barnaamijka kor loogu qaadayo xirfadaha haweenka, si ay kaalin uga qaataan nolosha qoyskooda, iyo guud ahaan koboca dhaqaalaha bulshada.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka 'Xoogsi Xalaal ah' oo ay ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, iyada oo maalgelinta ka helaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA. Kaas oo ay ujeeddadiisu tahay in il dakhli loo abuuro qoysaska danyarta ah, iyo in dhalinyarada rag iyo haweenba lagu dhiirrigeliyo xoogsiga, si loo yareeyo saboolnimada iyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda.

ARC Oo Xoolaysay Qoysas Xooluhu Ka Baxeen



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa adhi dhaqasho ah u qaybisay qoysas kala duwan oo xoolihii ka baxeen. Qoysaskan oo ku dhaqan baadiyaha magaaloooyinka Burco iyo Hargeysa ee Somaliland, ayaa mid kasta la siiyey saddex neef oo irmaan. Waxaa loogu talagalay in ay dhaqdaan si ay uga faa'idaystaan caanaha, subagga, iyo tarantooda.

Mashruucan oo sannad kasta xooliye boqollaal Soomaaliyeed oo ku dhaqan gobalka Geeska Afrika, waxa uu qayb

ka yahay Barnaamijka ballaadhan ee 'Xoogsi xalaal ah' oo sida oo kale qoysaska saboolka ah u fura meherado yaryar oo ganacsi, ama dhalinyarada bara xirfado iyo aqoon ka caawisa suuqa shaqada.

Barnaamijka Xoogsi xalaal ah oo ujeeddadiisu tahay in la yareeyo saboolnimada iyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda, waxaa maalgeliya samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt oo soo mariya hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.

WAXBARASHADA



Dugsiga Sare Ee Hablaha Oo Maamuusay Masuuliyiin Iyo Arday



Xaflad ballaadhan oo lagu soo xidhayey sannad-dugsiyeed Dugsiyada Hablaha, ayaa ka qabsoontay xarunta waxbarashada Kuweytiga ee magaalada Hargeysa. Xafladdan oo si heersare ah loo soo agaasimay waxaa ka soo qaybgalay maamulka sare ee Barnaamijka waxbarashada hay'adda ARC, maamulka iyo macallimiinta dugsiyada, waalidiinta iyo ardayda.

Ardayda ayaa munaasabadda ku soo bandhigeen barnaamijyo isugu jira maaweelo, wacygihin, bandhigyo hiddaha iyo dhaqanka ah, iyo masraxiyad ka turjumaysa dareenkooda la xidhiidha maqnaanshiyaha masjidka barakaysan ee Al-Aqsa (Qudus), iyo la dareen ahaanshiyaha dadka reer Falastiin. Taas oo abuurtay jawi isugu jira farxad iyo qiiro badan oo hadheedyey guud ahaan munaasabadda.

Masuuliyiinta kala duwan ee munaasabadda ka soo qaybgalay, iyo maamulka dugsiyada ayaa iyaguna munaasabadda ka jeediyey hadallo isugu jira bogaadin, hambalyo iyo guubaabo ay maamulka iyo ardaydaba ku guubaabinayeen sii wadista iyo sii qurxinta geeddigaas lagu dhisayo mustaqbalka ubaxa dalka

Mudane Adam Diiriye, maamulaha dugsiyada Hablaha ee xarunta Kuweytiga



oo munaasabadda ka hadlay ayaa soo dhoweynta iyo u mahadnaqa martida iyo mudanta munaasabadda kaddib, waxa uu ku dheeraaday muhiimadda waxbarashada iyo dhismaha mustaqbalka ubadka, waxa aanu bogaadiyey dadaalka ay arrintaas ugu jiraan macallimiinta iyo dhammaan dhinacyada ay khusayso waxbarashada xarunta Kuweytiga oo uu waalidka ardayduna ka mid yahay. Isaga oo ku dardaaray in wadajirkaas iyo iskaashigaas uun lagu gaadhi karo xaqiijinta himilooyinka waxbarasho ee ay dugsiyada Kuweytigu leeyihiin, waalidkuna la doonayaan ubadkooda.

Macallimiinta kala duwan ee dugsiyada ayaa munaasabaddan shahaado sharaf ku guddoonsiiyey maamule Adam Diiriye, iyaga oo ku bogaadinaya kaalinta hoggaamineed ee uu sida waayoaragnimada leh ugu wado maamulka iyo maaraynta hawlaha kala duwan ee dugsiyada.

Waxa kale oo munaasabaddan hadyado iyo abaalmarinno kala duwan lagu guddoonsiiyey ardayda kaalmaha sare ka gashay imtixaanaadka sannad-dugsiyeedka, iyo kuwa sannadkan muujiyey hal-abuurka aqooneed iyo farsamo.





@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278256

Phone: +252514333

E-Mail: somalia office1@gmail.com

Website: www.arcsom.org

